Qofka u adeega Garoobka iyo Miskiinka, wuxuu la mid yahay Mujaahidka jidka Ilaahay u dagaalamaa, ama Qof Habeenkiina cibaado u taagan Maalintiina Sooman

Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka u adeega Garoobka iyo Miskiinka, wuxuu la mid yahay Mujaahidka jidka Ilaahay u dagaalamaa, ama Qof Habeenkiina cibaado u taagan Maalintiina Sooman".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay Qofka ka shaqeeya danaha Dumarka Ragoodu ka dhintay cid u miciintana haysan, iyo Miskiinka baahidu hayso, wax siiya isagoo Ilaahay uun ajar kaga raba, Qofkaasi xaga ajarka wuxuu la mid yahay Mujaahidka Ilaahay dartii u dagaalamaya, ama Qofka Salaad Tahajudka u taagan ee aan daalayn, oo Sooman oo aan afurayn

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3135

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY
لجنة الدعوة الإلكترونية
EDC E-Da'wah Committee